

DHIIRIGELINTA SINNAANTA IYO WANAAGA EE WAX BARTE KASTA

Oregon waxaa ka go'aan u diyaarinta wax barte kasta ee aqoonta tacliimeed iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah in guul la gaaro wixii ka dambeeya dugsiga sare. Qiimeynta Gobolka Oregon ee Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska (ELA) iyo Xisaabta waxay si buuxda u waafaqsan yihiin Heerarka Gobolka Oregon waxayna ardayda fasallada 3-8 iyo 11, oo ay weheliyaan waalidiintooda siisaa, hal qiyaas oo ah guusha tacliimeed iyo kobaca.

QIIMEYNTA GOBOKKA OREGON...

- ...waxaa abuuray barayaasha Oregon iyo dhowr gobol oo kale
- ...waxay tartan gelisaa ilmahaaga sidii uu si adag ugu fikiri lahaa oo aqoontiisana u adeegsado xaaladaha kala duwan
- ...waxay dhaafsiisan tahay kala doorashada badan waxayna ilmahaaga weydiisaa in uu sharraxo jawaabihiisa
- ... waxay noqotaa oo muuqaal guud ka bixisaa horumarka ilmahaaga oo ay dhici karto lala tixgeliyo qaybo kale oo macluumaad ah si loo go'aamiyo guusha tacliimeed ee ilmahaaga
- ...waxay dugsiyada iyo degmooyinka ka caawisaa qiimeynta nidaamyadooda wax barida iyo waxbarashada, iyo sidoo kale aqoonsiga kooxaha ardayda ah ee baahiyahooda tacliimeed ay dhici karto in aan sidii ku habbooneyd loo buuxin
- ...waxay ka caawisaa fahamka sida wanaagsan ee dugsiyadooda dadweynuhu ay wax u qabanayaan

SHARAXAADA XUQUUQDA

Sharciga Oregon ee (ORS 329.479) ayaa waalidiinta iyo ardayda waaweyn u oggolaanaya in ay si sanadle ah aysan uga qayb qaadan qiimeynta gobolka Oregon ee Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska (ELA) iyo/ama Xisaabta iyaga oo foomkani sanadlaha u gudbinaya dugsiga uu ardaygu dhigto. Dugsiyadu waxay waalidiinta siin doonaan foomka saxda ah ugu yaraan 30 maalmood ka hor bilawga imtixaanka.

Waa maxay sababta ka qayb qaadashada ilmahaygu muhiim u tahay?

Iyada oo aysan jirin hal qiimeyn oo sawir buuxa ka bixin karta horumar ilmahaaga, qiimeynta gobolka oo dhan waxay barayaasha iyo maamulayaasha Oregon siisaa hal illood oo ah macluumaad ku saabsan hababka waxbarasho ee shaqeynaya iyo halka ay dhici karto in looga baahdo ilo dheeraad ah. Ka qayb qaadashada ilmahaygu waxay muhiim u tahay xaqiijinta in dugsiga iyo degmadu aqoonsadaan meelaha ay buuxinayaan baahiyaha guud ee ardayda, iyo sidoo kale in la aqoonsado meelaha kobacu ka jiro.

Goorma ayuu ilmahaygu qaadan doonaa imtixaanka?

Dugsiga ilmahaaga ayaa go'aamin doona taariikhaha gaarka ah ee ilmahaagu qaadan doono qiimeynta taasi oo ah waqtiga la qaadayo imtixaanada gobolka oo dhan.

WAQTIGA LA QAADAYO IMTIXAANKA GOBOLKA OO DHAN

Waqtiga la qaadayo imtixaanka gobolka oo dhan ee Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska iyo Xisaabta wuxuu khuseeyaa qiimeyn wadareedka guud iyo ta beddelka ah ee gobolka oo dhan labadoodaba.

Fasallada 3-8 03/30/2027 — 06/11/2027	Fasalka 11 02/02/2027 — 06/11/2027
---	--

LA SOCO WARKA

Booqo bogga internet-ka ee Starting Smarter ee Oregon (<https://or.startingsmarter.org>) si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato waxa ay tahay in ilmahaagu ka warqabo una awoodo in uu sameeyo Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska iyo Xisaabta, si loo eego tusaalaha su'aalaha qiimeynta iyo si loo akhriyo waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan natiijooyinka imtixaanka ee ilmahaaga. Kala xiriir macallinka ardaygaaga ama maamulaha dugsiga wixii su'aalo ah.